

## Hubinta Deganaanshaha

Si aad u sii heshid kaalmada Barnaamijka Kaalmada Daryeelka Carruurta ee Best Starts for Kids, dhammaan codsadayaasha waa inay xaqiijiyaan inay ku nool yihiin Degmada King.

Dokumentiyada la taariikhaysan lixdii bilood ee la soo dhaafay waa in lagu soo dhejiyaa codsigaaga khadka ee marinka qoyska. Hoos waxaa ku qoran liiska dokumentiyada la aqbali karo ee lagu xaqiijinayo deganaanshahaaga.

**Dokumentiyada la aqbali karo**  
Codsadayaashu waxay keeni karaan HAL dokument oo ka mid ah Liiska A ama LABA dokument oo ka mid ah Liiska B.

<b>Liiska A</b> - doorta HAL dokument - oo aad soo gudbiso -	<b>Liiska B</b> - doorta LABA dokument - oo aad soo gudbiso -
<ul style="list-style-type: none"> <li>• Bayaanka daynta guryaha ama heshiiska kireysiga ee hadda jira</li> <li>• Biilka adeegga (gaas, biyaha/qashinka, korontada, internetka)</li> <li>• Bayaanka caymiska guriga ama kireystaha</li> <li>• Kaarka Barnaamijka Asturnaanta Cinwaanka Gobolka Washington (taariikh looma baahna)</li> <li>• Qoysaska hoy la'aanta ah: Shahaadada Guriyeynta/Bayaanka Caddeynta ee ku jira codsiga             <ul style="list-style-type: none"> <li>◦ Tani waxay ku jiri doontaa isku xirka foomka xaqiijinta dhinac saddexaad</li> </ul> </li> </ul>	<ul style="list-style-type: none"> <li>• Kaarka Aqoonsiga Gobolka Washington</li> <li>• Liisanka Darawalnimada Gobolka Washington</li> <li>• Bayaanka bangiga</li> <li>• Bayaanka kaarka deynta, biilka taleefanka gacanta, ama biil kale</li> <li>• Warqadda mushaharka ee loo-shaqeeyaha</li> <li>• Kaarka qunsuliyadda ee waddan kasta</li> <li>• Risiidhka kirada</li> </ul>

### Tixgelinta Gaarka ah

Haddii aad la kulanto hoy la'aan, waxaa lagaa codsan doonaa inaad ka jawaabto Shahaadada Guriyeynta/Bayaanka Caddeynta ee ku jira codsiga. Tani waxay ku jiri doontaa isku xirka foomka xaqiijinta dhinac saddexaad, kaas oo laga buuxin karo qofka bixiya hoyga gaaban ama xubin bulshada ka tirsan oo xaqiijin kara deganaanshahaaga Degmada King.

Fadlan hubi in dokumentiyadaadu yihiin kuwo cusub oo cad si aad uga fogaato dib u dhac ku yimaada habka dib-u-ansixintaada.

### Ma u baahan tahay caawimaad?

Qoysaska waxaa lagu dhiirrigelinayaa inay la xiriiraan Kooda Geiitaanka iyo Taageerada Qoyska (FAS) si ay u helaan taageero inta lagu jiro habka dib-u-ansixinta.

• support@bskchildcare.org  
• (206) 208 - 6865

